

# Mishiinka pokie-ga maaha inuu marna lacag bixiyo.

Macna ma samaynayo waqtigaad ku cayaarto mishiinka, sidaad ugu celceliso, ama intaad lacag ku rido.

**Markaad sii cayaartaba, waad  
sii luminaysaa.**



# Caawima qarsoodi ah oo lacag la'aana

Wac Caawimada Khamarjiga (**Gambler's Help**) waqtii kasta oo aad rabto, weydiina inaad la kulanto lataliye kana hesho ballan qarsoodi ah oo lacag la'aana.

Waxaad heli kartaa mutarjum haddaad mid u baahan tahay.

Wac **1800 858 858** ama booqo  
[www.problemgambling.vic.gov.au](http://www.problemgambling.vic.gov.au).

A Victorian  
Government  
initiative



**gambler'shelp**  
1800 858 858

[problemgambling.vic.gov.au](http://problemgambling.vic.gov.au)

take the **problem** out of gambling



Waxaa soo saaray **Barnaamjiga Caawimada Khamarjiyiinta Dhaqamada kala duwan**

Waxaa kharajkiisa bixiyey Xafiiska Gaymamka iyo Tartanada, Wasaarada Cadaadlada

Xuquuqda daabacaada waxaa iska leh Xarunta Centre for Culture, Ethnicity & Health 2009



Markaad  
sii khamaartaba,  
**Markaad  
waxaad sii luminaysaa  
lacag.**

Waxaa la heli karaa caawima qarsoodi ah  
oo lacag la'aana.

**gambler'shelp**  
1800 858 858

[problemgambling.vic.gov.au](http://problemgambling.vic.gov.au)

take the **problem** out of gambling

Free and confidential 24hr service.  
Deaf, hearing or speech impaired  
call TTY 1800 777 706.  
Interpreting services available.

## Dhibaato ma ku qabtaa khamaarida?

- Ma ku lumisaa waqtii aad u badan ama lacag Khamaarida?
- Ma ku sii wadaa isku deyida inaad dib u hesho lacagtii lagaa hellay?
- Ma amaahtaa lacag aad ku sii khamaarto?
- Ma ku dareentaa dembi ama cadaadis khamaarida?
- Adiga ama qoyskaaga ma idin haysataa dhibaatooyin dhaqaale khamaarid darteed?



## Caawima ayaa la heli karaa

Caawimada khamarjiyiintu (Gambler's Help) waa lacag la'aan taas oo aad wici karto waqtii walba.

Waxaad awoodaa inaad noqoto qof aan la aqoon wax kasta oo aad tiraahdانا waxay noqon doonaan qarsoodi iyo wax gaar kuu ah.

Waxaad kala hadli kartaa sida loo kantaroolo ama loo joojiyo khamaarida, sida loo maamulo lacagta lagugu leeyahay.

Waxaad heli kartaa mutarjum Somali ah haddaad rabto. Mutarjumku wax kasta oo aad tiraahdo wuxuu u qaadanaya wax qarsoodi ah oo gaar kuu ah.



## Sida loo xafido naftaada

Waxyaalahaan ayaa ka mid ah siyaallaha lagu kantaroolo khamaaridaada.

- Kaararkaaga bangiga guriga kaga tag hana qaadan lacag aad u tira badan.
- Ka fogow dhigashada gaarigaaga goobta khamaarka agteeda si aanay kuu soo jiidan inaad gasho.
- Hel siyaalla kale oo aad naftaada u maaweeeliso – akhri buugaag – cab kofee ama cunto doono, soco ama wac saaxiib.
- Bixi ijarkaaga iyo biilasha sida ugu dhaqsaha badan, si aadan ugu fekerin inaad ku khamaarto lacagta.
- Haddii aad dareemayo dembi ama cadaadis khamaarka dartiis, waxaa kuu fiican inaad kaalmo raadiso intaad dareenkaas ku noolaan lahayd.
- Kala hadal dhibta qof aad aaminsan tahay. Haddii aadan doonayn inaad la hadasho qof aad taqaan, waxaad had iyo jeer wici kartaa Caawinta Khamarjiyiinta si qarsoodi ah oo gaara.